Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Documentiga Kol.3-aad-kul.8-aad **30/09/2013**

Kalfadhiga 3-aad
Kulankiisa 8-aad.Saac.Fur.11:48-Saac.Xir.20:20
Guntinta(Qourum)170

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Ka Doodista wax ka badalka Xeer-hoosaadka**

Shir-Gudoonka Guddoomiye Ku/XIgeenka Mudane Mahad Cabdalla Cawad,

Waxaa shirka furay Guddoomiye Ku/Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in la ansixiyo Ajendha Xilshibaanadiina wey ansixiyeen.Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay Qod.64-aad Far2-aad Xar.c,ee Xeer-hoosaadka,wuxuu sheegay in guddiga Xeer-hoosaadka ay ku soo gudbiyaan mudo 30 maalmood gudahood waxa ay soo diyaariyeen baahida wax ka badalka xeer-hoosaadka.kadib loosoo gudbiyo Golaha lana ansixiyo iyo wixii caqabad ah laga saaro qodobkaas ama qodob cusub lagu daro.

Inta aan laguda galin Ajendaha wuxuu u yeeray Xil.C/llaahi(habdhoore) si uu u akhriyo talo soo jeedinta Xeer-hoosaadka ay guddiga soo qoreyn.

Xil. Maxamed Cumar (Xog.Gud. Xeer-hoosaadka) wuxuu akhriyay talo soo jeediynta Guddiga Xeer-hoosaadka, wuxuuna wax aka sheegay Anshaxa, Xasanadda iyo Daryeelka,

Xil. C/qaadir (Gud.Gud) wuxuu sheegay in ay Xildhibaanada wax kabadali karaan waxana ku darikaraan

Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka C/kariin Xaaji Cabdi (Buux) wuxuu sheegay in shaqaalaha cusub ay Assignment ku soo sameeyeen Xeer-hoosaadka Afsoomaali iyo English

Xil. Mahad Maxamed Salaad wuxuu sheegay in ay tahay luuqada koowaad Af-soomaaliga tan labaadna ay tahay af –carabi
Kadib doodii ayaa bilaabatay Guddoomiyaha wuxuu yeeriyay Xildhibaano Gaaraya 30 oo ugu horeeyay Xil. Xagaafe.
Xil.Xagaafe wuxuu sheegay in habdhooorayaasha ay dhigmaan Guddiyada Baarlamaanka hadey awood dheeraad ah ay ku darsadan 16 ka Guddi arinta way isbadaleysaa.sidaas dardeed labada warqad waa out of order. Guddiga anshaxa waxaa ka maqan waajibaadka xuquuqdooda.
Xil. Maxamed Heyd wuxuu sheegay in xildhibaanka leeyahay xasaanad iyo xuquuq badan xildhibaanadana ay ilaaliyaan waqtiga.
Xil. Maxamed Salaad wuxuu sheegay in aan loo baahneyn sharci cusub waxaana ku filan in lagu dabaqo xeer-hoosaadka laga badalo qodobo qaar, sida laxisaabtanka xukuumadda.
Xil. C/laahi Jaamac wuxuu sheegay in Xeer-hoosaadka dib loogu noqdo labo fadhi oo isku xigta xildhibaankii ka maqnaada masuuliyadda isagaa iskaleh. Hadii saacado dheetaad ah lagu daraayo xildhibaanada wey fadihyaan hala soo hordhigo.
Xil. Xaaji Cabdi wuxuu u mahad celiyay Guddiga Xeer-hoosaadka iyo habdhoorayaasha Golahana dhaar ayuu maray inuu shaqeeyo waxaana haboon in waqtiga la qabsado layimaado lana rawaxo waxqtiga laqabsaday.
Guddoomiyaha wuxuu sheegay Qod.16-aad Far.3-aad ay sheegayso haddii xil.dhibaan soo xaadiro kadibna iska baxo wuxuu la mid yahay isagoo maalintaas maqnaa. Xubnaha fasaxa qaatay waa iney ku jiraan maxdarka.
Xil. Bashiir Caddow wuxuu sheegay in qoraalada lasoo qoray inta badan aysan ku qorneyn xeer-hoosaadka,wuxuu ku qoran xubnaha jooga, kuwa maqan iyo anshax marin.qod.16-aad xeer-hoosaadka wuxuu dhigayaa qofkii ka maqnaad shirka Golaha mudo sax jeer iska xigta in sharciga xeer-hoosaadka la waafajiyo. Haduu shirka isagoo socda isaga tago wuxuu lamid yahay isagoo maalintaa uusan imaanin shirka.wuxuuna soo jeediyay in dib u eegis lagu sameeyo Xeer-hoosaadka. Wax kabadalka xeer-hoosaadka wuxuu u baahan yahay markii qodob la laalaayo waa in la helo kooram 3/2 meel ama 50+1.
Xil. Maxamed Warsame Feysal, wuxuu soo qatay qod. 10-aad ee xeer-hoosaadka, wuxuuna sheegay in Xoghayeyaasha Barlamaanka ay xadgudub ku tahay, wuxuuna sheegay in cid kasta ay ogaato shaqada ay leedahay wuxuuna seken gareeyey Xil. Bashiir.
Xil. Shariif, wuxuu talo ahaan usoo jediyey in 9:00 subaxnimo Xildhibaanada ay yimaadaan, tankale wuxuu sheegay in Guddoonkana ay yimaadaan goor hore.

Xil. ibraahim Suleymaan, wuxuu su'aalay Gudiga cida iska leh fasiraada xeer-hoosaadka, wuxuu soo jeediyey in Guddiga lagu daro 2 shaeci yaqaano oo kala shaqeeya xaga sharciga.

Xil. Cilmi, wuxuu sheegay hadii Salaada kadib kooramka buuxsamo wuxuu soo jeediye in Xildhibaanka shirka waqti hore yimaado oo ah 9:00 aroornimo si shaqada loo wado, waqtiga oo lailaaliyo waa in leysku abaalmariyo lagana doonaayo Godoonka.

Xil. Maxamed Amiin, wuxuu sheegay in qofka laweydiinaayo waqtigiisa waxa uu kudhameystey berito.

1: in laga doodo waqiga Golaha
2: in qodobada wax laga badalaayo laga dodo
3: in jadwalka Baarlamaanka lasoo bandhigo
4: waa in xogheynta aad ushaqeyso

Xil. Khadiijo Maxamed Diiriye, waxay soo jeedisay

1: in lasoo dadajiyo qoddobada laga doodaayo
2: in waqtiga laga dhigo 9:00 subaxnimo ilaa 10:00 am
3: in shaqaalaha saacad ku qoraan warqada maxdarka (in liiska saacadana lagu daro) qod. 8-aad waqti cayiman lagu daro, qod. 10-aad ilaa 15-aad habdhowrayaasha waxkabadalka xeer-hoosaadka waa mihiim.

Xil. Cabdi Axmed Dhuxulow, wuxuu sheegay in lawaayey kooramkii Guddoonka wuxuuna soo jediye in Guddoonka shaqadooda qabsadaan xeer-hoosaadkana dib logu noqdo.

wuxuu sheegay Xildhibaanada siyaasiinta ah in uu bilaabanaayo dib udhiska maamul usameynta Gobolada, waxaana baxaayo Xildhibaano badan, howsha dib u eegista xeer-hoosaadkana waxaa larabaa in laqabto, wuxuu intaa ku daray in berito ay ku kabayaan Guddiga 5 xubnood si loo sii dardargaliyo loona sii diyaariyo qodobada xeer-hoosaadka, waxaana lasiiyey 2 maalmood si ay dib u eegis guud ay ugu soo sameyaan xee-hoosaadka.

Shir-guddoonka Guddoomiye k/x 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad wuxuu sheegay in shirka xiran yahay saacada markay aheyd 12:20gd